# JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WAR SAXAAFADEED

Anagoo ah Shaqaalaha Garsoorka kana kooban Xafiisyada kala ah:-

1. Maxkamadda Sare ee Dalka.
2. Xafiiska Xeer-ilaliyaha Guud ee Qaranka.
3. Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir.
4. Maxkamadda Gobolka Banaadir.
5. Maxkamaddaha Degmooyinka Gobolka Banaadir.

Maanta oo ay Taariikhdu tahay 03/07/2020 Waxaan Halkaan ku soo gudbinaynaa War saxaafadeed ku saabsan Imtixaan Sharci daro ah oo ay qaadayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaran iyo Garsoore Saalax Sh. Ibraahim Dhiblaawe oo ka tirsan Maxkamadda Sare oo aan waafaqsanayn Sharciga shaqaalaha Radiydka Dowlada ee Lr. 11 soona baxay 5/12/2006 ee Qodobadiisa 13-aad. iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay 1962 iyo Qodobka 109A Dastuurka KMG ee qeexaya In Dalacsiinta, Anshax Marinta, Shaqaalaha Garsoorka ay leeyihiin Golaha Adeega Garsoorka oo aan hada dhisnayn Muddo 6 sano ah.

Haddaba anagoo ka duuleeno Sharciga Shaqaalaha Rayidka **Qodobkiisa 28-aad ee ee Sharci lr. 11 ee soo baxay 05/12/2006.** oo sheegaaya in shaqaalaha ay diidi karaan Amarrada aan sharciga waafaqsanayn ee soo saaraan Madaxdooda isla markaana ay ku wargaliyaan meelaha ay ku haboon tahay

Waxaan Diidnay in aan ka qayb galno Imtixaanka Sharci darada ah ee aan waafaqsanayn Dastuurka iyo Sharciyada kale ee Dalka.

**WABILAAHI TOWFIIQ**